XUQUUQDA IYO WAAJIBAADKA KIREEYSTAHA

Finland qofka ijaarta ama kireeysta guri wuxuu leeyahay xuquuq iyo waajibaad saaran.

Sheyga ugu muhiimsan ee laga doonayo kireystaha guriga, waa bixinta ijaarka. Qaabka loo bixinayo ijaarka iyo taariikhda labixinayaba waa inay ku cadahay warqadda heshiiska kirada. Bilwaliba 2:deeda ayaa lacagta kirada la shubayaa hadaan wakhti kale lagu heshiin. Lacagta kirada ee aad shubtay waa in lagaa heli karaa cadayn ama risiidh.

Ijaartuhu wuxuu dejin karaa guriga xaaskiisa iyo caruurta reerka katirsan. Sidoo kale wuxuu dejin karaa qaraabada dhow, haddii aanan wax dhib ah uga imaaneyn mulkiilaha ama shirkadda guriga ijaartay. Ugu badnaan guriga barkiis (50%) ijaartuhu waa uu sii ijaari karaa, haddii uu ugolaansho ka heysto mulkiilaha ama shirkadda guriga.

Xeerka Guryaha Daganaanta waa in lafuliyo, gurigana dayactirkiisa guud la ilaaliyo. Haddii kireystuhu ama qof ogolaanshihiisa ku degan guriga uu xumeeyo ama wax kaja-jabiyo guriga, si bareer ah ama taxadar aan kujirin, waa in uu magdhow siiyaa mulkiilaha ama shirkada guriga. Sidoo kalana waa in lagu wargeliyaa mulkiilaha ama shirkada guriga wixii markaa dhacay. Ijaartaha guriga kama mas'uul aha haddii guriga si dabiici ah loo dayactiro.

Mulkiilaha ama shirkada guriga ayaa xil kasaaran yahay dayactirka guud . Sharcigu wuxuu ogolaanayaa in kireeyaha iyo kireystaha ka heshiin karaan qofka ka masuul noqonaya dayactirka guud ee guriga. Haddii kireystuhu doonayo in isagu uu guriga ku sameeyo dibu-habeyn waa in uu kala heshiiyaa mulkiilaha ama shirkada guriga. Sidoo kale waa in ay warqad ku kala saxiixdaan, dib-uhabeynta guriga lagu sameynayo sida ay u saameyn doonto qiimaha kirada ee bishii la bixiyo.

Ijaaraha guriga, waa in uu imaan karo guriga wakhti ku habboon kireystaha si uu u indho-indheeyo waxyaabaha guriga ka xun una baahan in la sameeyo. Sidoo kale kireystuhu waa in uu u saamaxaa kireeyaha in guriga dad uu tusi karo, markii guriga la iibgeenayo ama dib loo kireynayo. Kireeyaha marwaliba waa in uu kula heshiiyaa kireystaha xilliga iyo taariikhdaba. Kireeyaha waxa uu xaq u leeyahay oo keliya in uu guriga gudaha u soo galo bilaa idin la'aan marka lagama maarman noqoto sida guriga dab ka kaco ama tuubooyinka biyaha oo waxyeelo soo gaaraan.

HESHIISKA KIRADA

Heshiiska kirada waxaa lagu qeexayaa xeerka kirada. Waxaa lagu heshiin karaa, muddada kirada, dayactirka guriga,qiimaha kirada iyo ka warheynteeda. Haddii wax isbadal ku yimaadaan heshiiska kirada waa in waraaq lagu kala saxiixdaa. Haddii aan waraaq lagu kala saxiixan waa heshiish aan wakhti cayiman loo qaban. Goortii la doono guriga waa lagaa saari karaa.

Foomka ama warqadda heshiiska kirada waxaad ka heli kartaa tusaale bogga internetka ee wasaarada bay'adda www.ymparisto.fi/default.asp?node=11655&lan=fi. Waxaana ku dhan dhammaan wixii muhiim u ah qodobada heshiiska kirada. Wayna u wanaagsantahay kireystaha iyo kireeyaha in ay isticmaalaan.

Waxaa kujira qodobada ku xusan warqadda arimo muhiim ah, sida qiimaha kirada, qaabka bixinta iyo mudadda ama wakhtiga kirada ku egyahay. Haddii uu yahay mid kumeelgaar ah warqad qaabkale loo qoray waa la isticmaali karaa, muhiimadduse waxay tahay in labada qof kuwada heshiiyaan qodobada heshiiska ku qoran.

MUDADDA KIRADA

Mudadda ama wakhtiga kirada soconeyso waa laga wada heshiin karaa. Heshiiska kirada wuxuu ku dhaqan gelayaa laba qaab . Mid kumeelgaar ah oo wakhti cayiman loo qabtay, midna waa mid waqti cayiman aan loo qaban. Midka waqtiga cayiman loo qabtay, illaa waqtiga laga gaarayo midna ma burburin karo heshiiska, in daruufo keenaya dhacaan mooye. Heshiiska wuxuu dhamaanayaa markii waqtigiisa la gaaro.

Heshiiska aan waqtiga loo qaban, wuu soconayaa illaa kireystaha ama kireeyaha midkood uu kabaxo heshiishka. Kireystaha waa inuu 1 bil inta uusan guriga kabixin wargeliyaa kireeyaha. Tusaale haddii kireeyuhu guriga kabaxo 3.3 waa laga rabaa kirada bisha afaraad. Haddii kabixidda ka timaado dhanka kireeyaha waa in uu ku wargeliyaa kireystaha kahor 3 bil haddii uu deganaa 1 sano kayar guriga, haddii uu deganaaa wax kabadan sanad, wargelintaa waa in ay timaadaa 6 bil kahor.

Labada qaab ee heshiiseed, labadooduba waa la burburin karaa, haddii labada dhinac waa kireeyaha iyo kireystahe xaq u leeyihiin. Waxyaalaha saamaxaya in la burburin karo heshiiska waxaa lagu sheegay sharciga ijaarka guryaha. Heshiiska waxa uu sidoo kale ku dhamaan karaa labada dhinac oo ka heshiiya, sida haddii uu guriga burbur ku yimaado ama hay'adaha dowladda ay amar kusoo saaraan in gurigaas aan la degnaan karin, sababo jira awgeed.

QIIMAHA KIRADA

Qiimaha kirada wuxuu ku saleysanyahay waxa ay ku heshiiyaan labada dhinac. Sidoo kale kor u qaadidda qiimaha kirada muddo kadib waa mid dhici karta.

LACAGTA DIBAAJIGA KIRADA

Kireystaha, haddii uu kireeyaha waydiisto lacag deebaaji ah, waa inuu bixiyaa. Deebaajigu wuxuu noqon karaa kirada 3 bil ugu badnaan. Qaabka bixinta labada dhinac ayaa ka heshiinayo.

HORMARIN LACAGTA KIRADA

Marka heshiiska kirada la sameenayo waxaa sidoo kale laga heshiin karaa in kireystuhu uu bixiyo kirada guriga ugu badnaan 3 bil si hormarin ah.

JOOJINTA HESHIISKA KIRADA

Kireeyaha iyo kireystuhuba waa ay joojin karaan heshiiska kirada. Haddii kiraystuhu uu guriga ka guuro dhamaadka mudada heshiiska kirada, inta badan looma baahna in la siiyo kireeyaha ogeysiis qoran. Laakiin, waa in la eegaa nooca heshiiska kirada si loo hubsado in loo baahan yahay ogeysiis rasmi ah iyo in kale. Wakhtiga joojinta kirada waxaa laga xisaabiyaa bisha dhamaadkeeda. Tusaale haddii heshiiska la joojiyo 20 April, joojintu waxay ka bilaabmeysaa May bilawgeeda.

Marwalba oo heshiiska kirada la joojinayo, waa in warqad saxiixan la helaa oo ay ku cadahay in labada dhinacba ku qanacsanyihiin.

Haddii kireestaha uu joojiyo heshiis kiro oo aan wakhti loo qaban, looma baahna in uu faahfaahin kabixiyo sababta uu u joojiyay. Waana in uu ku wargeliyaa kireeyaha kahor 1 bil.

Haddii kireeyaha uu dhankiisa ka joojiyo heshiiskan, waa in uu bixiyaa wargelin qoraal ah laguna sheegayo, wakhtiga joojinta dhaceyso iyo sababta keentay.

Wakhtiga joojinta heshiiska waxay noqoneysaa 6 bil, marka kireestaha si joogta ah guriga u degnaa 1 sano. Wixii kayar 1 sano wakhtiga joojinta waa 3 bil.

HESHIISKA KUMEELGAARKA AH (WAKHTI GO'AN)

Heshiiska noocan ah, waxaa la burburin karaa iyadoo loo cuskado qodob kamid ah sharciga ijaarka ama degnaanshaha. Mararka qaar waxaa dhacda in go,aan maxkamadeed loo baahdo.

Tusaale dhinaca kireestaha, haddii reerkiisa qof kamid ah uu xanuun lasoo darso, u guurid goob kale ama xaalad kale oo u saamaxayn kireestaha in wakhtigii kirada uu dhammeysto.

Kireeyaha guriga, wuxuu heshiiska noocan ah joojin karaa, tusaale marka uu guriga isaga shaqsi ahaan u baahi qabo ama qof reerkiisa kamid ah, isagoo marka heshiiska lagelayay arrinkan kawar-heynin.

Haddii is-afgarad lagu ahayn joojinta heshiiska aan wakhtigiisi lagaarin, maxkamadda ayaa loo gudbin karaa in ay gasho arrinka. 3 bil gudahood, waa in maxkamadda lagu wargeliyaa laga bilaabo xilliga lagu dhawaaqay joojinta heshiiska.

DHAMMAYNTA MUDDADA KIRADA

Heshiiska kirada wuxuu dhammaanayaa markiiba oo uu kireeyaha ama kireestaha saxiixo. Kireeyaha wuxuu dhameyn karaa heshiiska haddii qodobada sharciga u saamaxo. Sida haddii kireeyuhu bixin waayo 2 bil kiradood, la daahidda kirooyinka bilaha, guriga oo dayactirxumi ku timaado, ijaarka guriga oo qofkale lagu wareejiyo si aan sharciga waafaqsaneyn ama haddii ay dhibaato layimaadaan dadka guriga dagan.

Kireeyaha waa in ogeysiis qoraal ah ku wargeliyaa kireestaha dhammeynta heshiiska. Haddii dhameynta heshiiska ay ku saleysantahay dhibaato dadka guriga la imaadeen, waa in marka hore digniin qoraal ah bixiyaa kireeyaha inta uusan dhameyn heshiiska Digniin qoraal ah lagama rabo kireeyaha haddii kireestaha bixin waayo kirada guriga, guriga si aan sharci ahayn qofkale lagu

wareejiyo, ama kireestuhu hadii uu guriga waxyeeleeyo.

Kireestuhu waxa uu xaq u leeyahay in uu dhammeeyo heshiiska, haddii degnaanshaha guriga wax dhib ah ka soo gaarayo caafimaadka dadka guriga degan. Arrintan waxaa xaqiijin kara waaxyada caafimaadka u qaabilsan maamulka degmadda.

MAALINKA KA GUURIDDA GURIGA & DIB U-DHIGGEEDA

Maalinta guuridda waxay noqoneysaa maalinta dhammaadka mudadda kirada, maalinka xiga ee 5 maalin shaqada ah. Kireestuhu wuxuu dalban karaa in loo badalo maalinta guuridda, haddii ay ku noqoto mid uusan siyaabo jira awgeed ku guuri karin.

Maalinta guuridda waxaa dib loo dhigi karaa ugu badnaan 1 sano. Codsiga dib u dhigista waa in loo gudbiyaa maxkamadda bil kahor inta aan lagaarin wakhtiga maalinta guurista ah.

Maxkamadda dib uma dhigi karto guuridda, haddii kireestaha isagu uu joojiyay ama dhameeyay heshiiska, haddii kireeyaha xaq u leeyahay dhammeynta heshiiska ama haddii heshiiska ahaa mid kumeelgaar ah ama haddii dib u dhigga dhibaato kasoo gaareyso kireeyaha ama shaqsi kale.

IJAARTE HOOSE / GURIGA OO QOFKALE DHINAC KA DAGO

Heshiiska noocan ah waxa uu dhacaa marka, guri lagaa ijaaray oo aad degantahay qolalka qaar kasii ijaarto qof kale.

Joojinta heshiiska noocan ah, kireeyaha waa in uu ku wargeliyaa 3 bil kahor, haddii ijaartaha hoose guriga daganaa ugu yaraan 1 sano. Sanad kayarna waa 1 bil. Wakhtiga joojinta bilaabmeyso 14 maalin kahor waa in kireeyaha uu ku wargeliyaa ijaartaha hoose.

SII IJAARID

Haddii ijaaruhu sii ijaaro guri laga ijaaray, waxaa halkaas ka dhalanaya heshiis sii ijaarid ah. Qofka laga sii ijaaray guri wuxuu leeyahay qodobo sharci ah ku aadan burburinta heshiiska lala galay. Mulkiilaha guriga wuxuu xaq u leeyahay in uu burburiyo heshiiska qofka guriga laga sii ijaaray, hadii uu wax dhib ku ah guriga la imaado.

GURYAHA SHAQAALAHA

Marka guryaha shaqaalaha lagaa ijaaro, waa guri ay kaa ijaareyso ama kuu qabanqaabisay shirkadda aad u shaqeyneyso. Muddadda ijaarkana waa inta aad shirkadda shaqo u heyso. Haddii ay dhacdo in guriga lagaa saaro waa in aad ka heshaa kireeyaha ogeysiis 1 - 6 bil kahor inta mudadda saarista la gaarin.

Kireestaha waxa uu guriga kabixi karaa dhamaadka shaqadiisa, ama kahor 14 maalin marka shaqada laga eryo.